



Qaybta Falanqaynta Hubinta
Cuntada ee
Soomaaliya

Waxa la soo saaray bisha
Laba-iyto-tobnaad 14, 2006

Hubinta Cuntada & Nafaqada

Warbixinta Fiiirada Qodobada Halista ah

Qiimaynta Hubinta Cuntada iyo Nafaqada ee Deyrta 2006/7 kadib ee FSAU ay hoggaaminaysaa waxay ku billaabantay kulamo qorshayn ah oo 11kii iyo 12kii Bishii Laba-iyto-tobnaad lala yeeshay hay'adaha heerka gobol la isbahaysto. Kulamadaas oo ka dhacay Wajid (Bakool), Kismaayo (Jubbooyinka), Marka (shabeellooyinka), Beled Weyne (Hiirraan), Garoowe (Nugaal), iyo Hargeysa (W. Galbeed). Howsha gudaha iyo falanqayntu waxay socon doontaa afarta toddobaad ee soo socda naatiijoyinka muhiimka ahna waxa la soo saari doonaa dhammaadka Bisha Kowaad 2007. Qiimaynta xaaladda Daadadka ah oo ka mid ah qiimaynta Deyrta Kadib waxa laga samayn doonaa dhammaan dhulka webiyada, taasoo beddelaysaa qiimayntii dalagga oo badi ku burburay daadadka. Qiimaynta buuxda oo saasaarka dalagga dhulka webiyada ee xiliga caadi ah ka baxsan waxa la samayn doonaa bilaha Labaad/Saddexaad 2007.

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha
Gobolka ee
Soo
Shaacbaxaya

NATIJOOYINKA UGU MUHIIMSAN

CIMILADA: Geeska Afrika waxa iminka ka jira Duufaanka El-Niino oo dhexdhexaad ah, oo keenay roobab mahiigaan ahi inay ka da'een goobo badan oo ay ku jirto Soomaaliya. Bishii Tobnaad iyo bishii Kow-iyto-tobnaad roobabka Deyrta waxay si weyn uga da'een Itoobiya, Kiiniya iyo Soomaaliya taasoo keentay daadad aad u culsi inay ka dhaceen sadexdaas dal. Qaybo badan oo Soomaaliya ah, roobabka Deyrta way ka badanaayeen boqolkiiba 200 sida caadiga ah. Jubbooyinka oo ka mid ah gobollada aadka

ay abaartu dhowaan u saamaysay roobabka ka da'ay way ka badanaayeen boqolkiiba 300 sida caadiga ah. Roobabka Deyrta ee ka da'ay badi gobollada dhexe iyo gobollada waqooyigu iyaguna caadi way ka sarreeyeen. Sida ay sheegayso Xarunta Saadaasha iyo Ku-Dhaqanka Cimilada ee IGAD, roobabka caadiga ka sarreeya waxa la filayaa inay sii socon doonaan illaa bilowga sannadka soo socda (*bogga 2*).

DAADADKA: Soomaaliya waxa soo foodsartay xiisad kale oo bina-aadamnimo, iyadoo ay daadad waxyeello weyn keenay oo ah kuwii ugu xumaa taariikhda dhow ay qaadeen bulshooyinka dega hareeraha webiyada Shabeelle iyo Jubba bishii Kow-iyto-tobnaad. Inkastoo ay adagtahay in la xaqiijiyi qiyaasta ugu fiican ee la bixin karaa waxa weeye in illaa 450,000 qof daadku ay barakiciyeen bishii Kow-iyto-tobnaad gobollada Gedo, Hiirraan, Jubba iyo Shabeellooyinka. Webiga Shabeelle dhulkuu maro ee magaalada Beled Weyne, wuxuu gaadhay halkii ugu sarraysay muddo 50 sannadood ah billowgii bishii Kow-iyto-tobnaad, waxana uu qaaday saldhiggii aaladda qiyaasta biyaha webiga, buundada u weyn ee laga tallaabo, badi magaalada Beled Weyne iyo tuulooyinka uu webigu sii maro. Sidoo kale, heerka biyaha webiga ee Luuq gobolka Gedo wuxuu gaadhay halkii ugu sarraysay muddo 20 sano ah taasoo keentay mowjado xoog leh oo jebiyey daamanka webiga iyo in daadad xun oo rogmaday dhulka uu webigu sii maro.

Daadadkaasi waxay qaadeen tuulooyin iyo magaalooyin beerlay ah, kumanaan hektar oo beero ah oo ku hareeraysan webiyada Jubba iyo Shabeelle, waxay barakiciyeen bulshooyin, waxay waxyeello gaadhsiyeen guryo, waddooyinkii, biyo mareenno, bakhaarro iyo hanti kale oo hab-nololeedka ah. Jawaab-celinta bina-aadamnimado weli way socotaa Jimciyadda Quruumaha ka dhaxaysana waxay soo saartaay Codsii Gaar ah oo Qorshe Jawaab-celinta Daadadka ah 6dii bishii Laba-iyto-tobnaad. Hadda, goobaha walaaca ugu badan laga qabaa waa Jubbooyinka, maddaama daadadku ay si buuxda u go'doomiyeen badi gobolladaas oo gaadhiddoodu ay ku koobantahay doonyo iyo diyaaradaha Helikobtarka (*bogga 2 iyo 3*).

NABAD LA'AANTA: FSAU waxay ku waddaa inay ku nuuxnuuxsanayso in si weyn ay u kordhi doonto xiisadda bina-aadamnimada ee ka jirta Koonfurta Soomaaliya baaxaddeeda, heerka ay xumaanteeda iyo muddada ay jiraysaaba haddii colaad ballaadhani ay dhacdo. Ogolaanshaha Qaraarka 1725 (2006) ee Golaha Ammaanka ee Jimciyadda Quruumaha Ka Dhaxaysaa ee 6dii bisha Laba-iyto-tobnaad, abaabulka saadka ciidamada gaashaandhigga ee socda iyo joogitaanka ciidamada shisheeyaha ee Soomaaliya waxa ay dhammaan arrimahaasi sii kordhinayaan halista ka imanaysa colaad balaadhani inay dhacdo. Xiisadda ka dhaxaysa Golaha Maxkamada Islaamiga ah ee Soomaalida (CSIC) iyo Dawladda Ku Meel-gaadhka ah ee Federaaliga ah (TFG) way sii kordhaysaa oo horeba dagaallo ayaa laga soo sheegay qaybo ah gobollada Baay iyo Dhexe bisha Laba-iyto-tobnaad (*bogga - 4*).

BEERAHA: Daadadka iyo roobab culus ayaa waxyeello gaadhsiyey dalagga taagan, bakhaaradda kaydka cuntada ee dhulka hoostisa ah waxana ay yareeyeen gaadhidda suuqada dhulka webiyada iyo dhulka gudaha. Qiimaha dalagga si weyn ayuu u kordhay dhulka ay daadadku sida xun u saameeyeen fursad-u-helidda ama gaadhidda iyo saadka suuqa oo kooban dartood. Warbixinaha hore ee ka imanaya guduuhu waxay tilmaamayaan in goobaha qaar, khasaaraha ama lumidda dalagga xiliga deyrtu uu yahay qiyaastii 100%. FSAU iyo iyo hay'adaha ay isbahaystaan waxay ka samaynayaan qiimaynta xaaladda daadadka ah dhammaan dhulka webiyada si ay u xaqiijiyaan heerka ay gaadhsiisantahay waxyeellada daadadku. Haddii aanay jirin daadad kale, abuurka xilliga caadiga ah ka baxsan ee Deyrta wuxuu noqon karaa mid aad u weyn waxana uu socon doonaa dhammaadka bisha Laba-iyto-tobnaad illaa dhammaadka bisha Labaad ee 2007. Waxa la filayaa in soosaarka dalagga xilliga caadiga ah ka baxsan ee Deyrta iyo ka Guga 2007 ay isku mar go'aan. FSAU waxay ka samayn doontaa qiimaynta soosaarka dalagga xilliga caadiga ah ka baxsan dhulka webiyada ee bisha Labaad/bisha Saddexaad ee 2007 (*bogga 4 iyo 5*).

XOOLAHA: Roobabka Deyrta oo caadi ka sarreeya ayaa ka da'ay dhammaan dalka kuna wada inay hore u marinayaan xaaladaha daaqa, cowska iyo biyaha taasoo keentay horumarin ah xaaladaha jidhka iyo soosaarka xoolaha yaraysayna guuritaanka. Hase yeeshee, roobab mahiigaan ah iyo daadad ka dhacay dhulka webiyada ayaa keenay in xooluhu ay u guuraan dhulka miyiga ee gudaha. Qiimaha dhammaan noocyada xooluhu aad ayay u fiicnaadeen taasoo keenaysaa horumar iswaydaarsiga ganacsiga ka dhaxeeya xoolaha iyo dalagga. Gobollada hore ay abaartu u saamaysay ee koofurta, xoola-dhaqatadu si buuxda ugama faa'iidaystaan horumarka iswaydaarsiga ganacsiga maaddaama ay isku dayayaan inay soo kabato tirada xoolaha ee hoos u dhacday. Waxa intaas raaca, suuqyada xoolaha ee gobollada Jubbooyinka iyo Gedo ma shaqaynayaan fursad-u-helid la'aan ka timi daadadka darteed. Dhoofinta xoolaha ee waqooyigu way sii kordhaysaa taasoo u dhiganta heerarkii sannadkii la soo dhaafay. (*bogga 5*).

SUUQYADA: Inkasta oo dhowaan ay kordheen xiisadda bulshada iyo isu diyaarinta dagaalku, heerarka sarrifka Shilinka Soomaaliya iyo Shilinka Soomaalilaand qiimahooda marka loo eego Doolarka Maraykanku wali wuu xasilloonaa saddexdii bilood ee la soo dhaafay. Badi qiimaha badeecadda dibedda laga keenaa wuu xasilloonaa, marka laga reebo gobollada Jubbooyinka oo uu kordhay boqolkiiba 5-30 taasoo ka timi fursad u helid la'aanta gooboladaas ee la xidhiidha roobabka culus iyo daadadka (*bogga 5*).

NAFAQADA: Daadadka waxa laga yaabaa inay saameeyaan xaaladda nafaqada ee kooxaha nugul, inkastoo illaa hadda saamaynta degdegga ahi aanay muuqan waayo nafaqadi waa tilmaame natiijadiisu ay mar dambe soo baxdo. Hase yeeshee, saamaynta degdegga ah waxa ku jira fursad-u-helidda daryeelka caafimaadka oo hoos u dhacday, iyo u dayacanaanta cuduradda ka dhasha biyaha sumooba oo sii korodhay. Howlaha dadaalka ah ee lagu kormeerayo saamaynta xaaladda nafaqada way socdaan waxana lagu dari doonaa qiimaynta Deyrta Kadib ee FSAU. (*bogga 6*).

Cinwaanka:

FSAU - Somalia

Kalson Towers,

Parklands

Box 1230 Village Market

Nairobi, Kenya

Tilifoonka:

+254 20 374 5734

Faakiska:

+254 20 374 5098


Iimayka:

fsauinfo@fsau.or.ke


www.fsausomali.org

ARRIMAHA UGU MUHIIMSAN **Qaybaha**

Khariidadda 1: Iskudarka roobabka : bisha Kow-iyto-bobnaad '06




Khariidadda 2: I Boqolkiiba roobka caadiga ah ee bisha Kow-iyto-bobnaad '06




Waxa soo saaray: USGS/FEWS NET

Tusmada 1: Shabeelle - Beled Weyne



Dhul uu wareegiisu yahay 207000.0 Km

Tusmada 2: Jubba - Luuq



Dhul uu wareegiisu yahay 166000.0 Km



Waxa soo saaray: FAO – Mashruuca Maamulka Wararka Biyaha iyo dhulka (SWALIM) – 25ka bisha Kow-iyto-bobnaad 2006

CIMILADA DAADADKA

Roobabka Deyrta 2006 wali waxay ku wadaan inay caadi ka sarreeyaan koonfurta iyo gobollada dhexe ee Soomaaliya duufaanka El Niino ee dhexdhexaadka ah ee socda dartiis. Roobab mahiigaan ah oo keenay daadad ku kooban dagmooyin ayaa ka da'ay badi dalka bishii Kow-iyto-bobnaad.

Koonfurta, sawirka qalabka satalaytka lagu qaaday sida uu muujinayo (Khariidadda 1 iyo 2) warbixinaha guduhuna ay xaqiijinayaan roobabka da'ay bisha Kow-iyto-bobnaad aad ayay caadi uga sarreeyeen gobollada Jubbooyinka, qaybo ah Gedo, Baay, Hiiraan iyo Shabeellooyinka. Marka loo eego roobabka da'ay iyo ka caadi ahaan da' xiligan waxa muuqata in roobabka illaa hadda da'ay ay yihiin boqolkiiba 200 iyo 300 sida caadiga ah, iyadoo qaybo ah Jubbooyinka ay heleen in ka badan boqolkiiba 300 sida caadiga ah. Sidoo kale badi gobollada dhexe iyo waqooyigu waxay heleen roobab fiican, oo ka badan boqolkiiba 200 sida caadiga u ah gobollada Bari, Nugaal, Sool, Mudug, iyo Hawdka Hargeysa. Waxa sidan ka reebban Hawdka Hargeysa iyo qaybo ka mid ah Awdal (Khariidadda 2), oo roobabaku badi ay ka hooseeyeen caadi bishii Kow-iyto-bobnaad. Waxay se heleen roobab bilihii Sagaalada iyo Tobnaad.

Dalalka deriska ah ee Kiiniya iyo Itoobiya sidoo kale waxay heleen roobab culus oo caadi ka sarreeya xiligan, maddaama xaaladda duufaanka El Niino ee dhexdhexaadka ahi ay wali ka jirto dhammaan dalka kulaylaha ah ee Badweynaha Baasifigga. Roobab culus oo ka da'ay qaybaha kore ee ay maraan webiyada Jubba iyo Shabeelle ee dalka buuralayda ah ee Itoobiya ayaa keenay in waxyeello weyn ay gaadhsiiyeen daadadka ku soo rogmaday qaybaha hoose ee ay webiyadu maraan ee Soomaaliya bishii bilihii Tobnaad iyo bishii Kow-iyto-bobnaad. Bishii Kow-iyto-bobnaad, heerarka weybiyada Shebeelle iyo Jubba oo sarreeyey oo fatahay ayaa keenay daadad aad u xumi oo ku soo rogmaday qaybo ah dhulka webiyada ee Gedo, Jubbooyinka, Hiiraan iyo Shabeelle. Daadadkaasi waxay qaadeen tuulooyin, magaalooyin kumannaan hektar oo ah dhulka beeraha ee ku hareeraysan webiyada ee koonfurta.

Daadadku waxay barakiciyeen bulshooyin, waxay waxyeelleeyeen guryo, waddooyin, biyo-mareenno, dalagii taagan, bakaaro iyo hanti kale oo hab-nololeedka ah oo muhiim ah. Fatahan aan caadiga ahayn ee webiyadu wuxuu u dhigmaa sidii dhacday muddo 50 sano ka hor ah gaar ahaan heerka uu gaadhay webigu magaalada Beled Weyne bisha Kow-iyto-bobnaad (Tusmada 1). Waxana ay taasi keentay daadadkii ugu xumaa taariikhda magaalada Beled Weyne iyo tuulooyinka ka hooseeya. Waxana ku barakacay gobolka Hiiraan in ka badan 100,000 (Sanaduuqa 1). Daadad aad u xun ayaa ka dhacay gobolka Shabeellaha Dhexe oo keenay daadku ku soo rogmaday tuulooyinka, iyo beeraha oo barakiciyey qiyaastii 160,000 oo qof. Hase yeeshee, heerarka webigu iminka hoos ayay u dhacayaan, magaalada Jowhar wuxuu webigu hoos uga soo dhacay 4.25m 2dii bisha Laba-iyto-bobnaad, waxana uu noqday 4.20m 3dii bisha, 5tii bishana wuxuu ahaa 4.10m. Inkasta oo daadadku ay ka dhaceen gobolka Shabeellada Hoose, daadadka iyo saamayntooda degdegga ahi way ka yarihiin sida ka dhacday goobaha ka korreeya ee uu webigu soo maro, iyadoo badi daadadku ay ka dhacayaan degmooyinka Afgooye, Kurtunwarrey, iyo Sablaale. Sidoo kale,

Sanduuqa 1: Qiyaasta Dadweynaha Barkacay Dhulka Webiyada Shabeelle iyo Jubba - Roobabka xiliga Deyrta 2006

Dhulka Webiyada	Gobolka	Wadarta Dadweynaha ee UNDP 2005 ¹	QIYAASAH LA SAADAALIYEE E DAADADKA ²		BARAKACA DADWEYNAHA	
			Ku salaysan Degmooyinkii 1975 (Dadweynaha UNDP 2005) ³		Qiyaasaha ugu fiican ee la hayo: 08/12 3.00 galabnimo ⁴ (wadarta #)	Qiyaasta Ugu Fiican ee Qorshaynta: Daadadka Muddo 10 sano ah ⁵ (Wadarta #)
			Daadadka Muddo 5 sano ah	Daadadka Muddo 10 sano ah		
Dhulka Webiga Shabeelle		1,695,363	174,975	540,938	299,000	541,000
	Hiran	329,811	27,947	62,565	104,000	62,500
	Shabeellaha Dhexe	514,901	65,251	112,889	159,000	113,000
	Shabeellaha Hoose	850,651	81,777	365,484	36,000 ⁶	365,500
Dhulka Webiga Jubba		953,045	263,475	361,247	155,500	361,000
	Gedo	328,378	28,018	32,059	36,000	32,000
	Jubbada Dhexe	238,877	36,142	104,444	102,000	104,500
	Jubbada Hoose	385,790	199,315	224,744	17,500 ⁷	225,000
WADARTA		2,648,408	438,450	902,185	454,500	902,000

Arrimaha la meleeyo:

• Dadweynaha barakacay waxa lagu sifeeyey inay si toos ah ugu barakaceen daadadka ku soo rogmaday • Dadweynaha barakacay xisaabtoodu waxay ka timi iyadoo la isku dhufay tirada qoyska iyo qiyaasta 6 • Haddii tiro kala duwan laga bixiyo tirada dadka barakacay ta kore ayaa la isticmaalay

Tixraacyada:

1. Qiyaasta dadweynaha oo ah heer gobol/degmo, UNDP Soomaaliya, bisha Siddeedaad 1, 2005. FSAU ma soo koobto qiyaasaha dadweynaha maadaama ay yihiin qiyaaso rasmi ah oo ay bixiso UNDP.
2. Khariidadda Daadadka waxa ku qoran degmooyinka si loo qiyaaso dadweynaha barakacay
3. Qiyaasta dadweynuhu waxay ku salaysantahay heerarka degmooyinka ee 1975 oo lagu habeeyey qiyaasaha dadweynaha ee UNDP ee 2005
4. Sanduuqa waxa la cusboonaysiiyaa maalin kasta iyadoo warka cusub lagu daryo inta ka horraaysa 3.00 galabnimo. Tirada waxa lagu soo koobay 500 ee ugu dhow.
5. Tirada la waxa lagu soo koobay 500 ee ugu dhow. Meelaha ay tirada dadka barakacay 08/12 ay ka badanyihiin tirada la qorsheeyey, isticmaal labada tiro ta badan.
6. Warbixinaha dhamaystirani waxay muujinayaan in dadka barakacay ee Shabeellada Hoose ay yariyihiin.
7. Degmooyinka qaar ka mid ah gobolladaas ayaa soo sheegay daadad laakiin lama bixin tirada dadka barakacay

daadadka webiga Jubba ee degmada Luuq waxay gaadheen heerkii u sarryeeyey muddo 20 sano ah dhammaadkii bishii Tobnaad iyo billowgii bishii Kow-iyto-bnaad (Tusmada 2). Saamaynta dhulka hoose ay ku yeeshen heerarka sare fataha webigu aad ayay u xuntahay bulshooyinka dhulka webiyada ee Jubbooyinka, taasoo lagu qiyaasay in boqolkiiba 100 degmooyinka ay daadad ku soo rogmadeen ama in si buuxda ay u go'doomiyeen biyaha daadadka ee ku hareeraysani (Sawirrada 1-3). Degmada Jilib iyo goobo kale, biyaha daadadku waxa la sheegay inay gaadheen illaa 10 kiiloo mitir labada dhinac ee webiga iyo in badi goobaha ku hareeraysan webiga iminka lagu gaadhi karo oo keliya doonyo iyo diyaaradaha helikobtarka ah. Roobabka culus ee ka da'ay Soomaaliya gudaheedu waxay sii xumeeyeen daadadka dhulka webiyada oo waxay keeneen in biyaha roobku ay dhulka korkiisa sabbeeyeen iyo in daadad ay ku soo rogmadeen dhulka dooxada ah ee Afmadow iyo goobo ah dhulka soohdinta la leh Kiiniya. Inkasta oo aan weli la xaqiijin warbixinaha guduuhu waxay muujinayaan in illaa 38,000 oo qof ay barakiciyeen daadadka ka dhacay qaybo ah Afmadow. Daadad ka dhacay dhulka gudaha ee Wanlaweyn, Shabeellada Hoose ayaa iyagana la soo sheegay kadib markii biya-mareenka Mahadaay uu meelo ka jabay, biyuhu waxa la soo sheegay inay marayaan isla waddooyinkii ay mareen daadadkii sannadihii 1981 iyo 1997/98. Sida ay sheegayso Xarunta Saadaasha iyo Ku-Dhaqanka Cimilada ee IGAD. Xaaladda duufaanka El Niino ee dhexdhexaadka ah oo ay weheliyaan isbedellada kulaylka Badda Korkeeda waxa laga yaabaa inay keeni doonaan in roobabka Deyrta ay sii socdaan illaa bisha Kowaad oo caadi ahaan qalalan.

NABAD LA'AANTA

FSAU waxay ku waddaa inay tilmaamayso halista ka imanaysa colaad balaadhan oo ku fidda dhammaan Koonfurta iyo Gobollada Dhexe oo dhex marta Dawladda Ku Meelgaadhka ah ee Federaaliga ah (TFG) iyo Golaha Maxkamadaha Islaamiga ah ee Soomaalida (CSIC) (oo hore loogu yaqaannay Midowga Maxmadaha Islaamiga ah). Golaha Ammaanka ee Jimciyadda Quruumaha Ka Dhaxaysaa wuxuu ogolaaday Qaraarka 1725 (2006) 6dii bisha Laba-iyto-bnaad taasoo sii kordhinaysa halista.



1,2: Jubbada Dhexe – Magaalada Jilib, bisha Kow-iyto-bnaad 2006

3: Jubbada Dhexe – bisha Kow-iyto-bnaad 2006

4,5: Gedo – Baardheere, bisha Kow-iyto-bnaad 2006

6,7: Hiiraan - Beled Weyne, bisha Kow-iyto-bnaad 2006



cimilada iyo daadadka

Saamaynta colaad balaadhani ay ku yeelanaysa xaaladda bina-aadamnimadu waxay noqonaysaa mid aad u weyn, u xun, isla markaana waarta, maaddaama ay si kordhin doonto xaaladaha hore u jiray ee **Gurmad Bina-aadamnimo iyo Xiisaad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** taasoo taabanaysa in ka badan 1.1 milyuun oo qof oo jooga koonfurta. Gurmadka Bina-aadamnimada ee Daadadku wuxuu horeba u barakiciyey qiyaastii 450,000 oo qof dhulka webiyada Shabeelle iyo Jubba. Abaabulka saadka ciidamada gaashaan-dhigga iyo joogitaanka ciidamada shisheeyaha ee Soomaaliya waxay ku wadaan inay kordhinayaan xiisadda ka dhex taagaan CSIC iyo TFG. Waxa la soo sheegay in horeba dagaallo ay dhexmareen kooxo qaybo ah Baay iyo gobollada Dhexe. Inkastoo badi dadka barakacay bishii Kow-iyto-tobnaad ay sababtu ahayd daadad (eeg Sanduuqa 1), Barakaca nabad la'aantu wuxuu dhacay kadib iska horimaadyo ka dhacay Mudug (Bandiiradley) iyo gobolka Baay (Diinsor iyo Buur-Xakaba).

Waxa jira walaac laga qabo in xayirrada ay CSIC ku soo rogtay shiidaalka ka imanaya Muqdishu ee tegaya dhulka ay garacanta ku hayso TFG taasoo saamaynaysaa qiimaha shiidaalka goobo ah Koonfurta (iyo gaadiidka). Qiimaha halka Litir ee naafatada ahi Xuddur kor wuxuu uga kacay 13,000 ShSo bishii Tobnaad isagoo gaadhay 17,250 ShSo bishii Kow-iyto-tobnaad, inkastoo ay adagtahay in tan loo aaneeyo oo keliya "xayirrada" (eeg Qaybta ku saabsan Suuqa). Qiimaha shiidaalka kordhkiisu wuxuu si toos ah u saamayn doonaa kharashka gaadiidka ee goobahaas taasina waxay saamayn doontaa qiimaha badeecadda dibedda laga keeno iyo aayaha dambe baabuurta ay kiraystaan ururrada bina-aadamnimadu.

BEERAHA

Koonfurta, roobab caadi ka sarreeya iyo daadadka ka dhacay dhulka webiyada iyo xoola-iyto-beera-dhaqatadu saamayntoodu way isku jirtaa. Waxyeellada gaadhay dalagga taagan, bakhaarradii cuntada ee dhulka oo khasaaray, iyo gaadhidda suuqada webiyada iyo dhulka gudaha ee yaraatay saamayn degdeg ah iyo mid muddada dheer ah ayay ku leeyihiin hubinta cuntada iyo hab-nololeedka. Wararka ka imanaya guduuhu waxay tilmaamayaan in goobaha qaar khasaaraha dalagga xiliga Deyrta lagu qiyaasay inuu noqon doono 100%. Jubbadda Hoose iyo Dhexe Qiyaasaha wadarta khasaaraha ee hordhaca ah ee ku saabsan Derytani qiyaastii waa 9,000 hektar oo galay ah, 14,200 hektar oo sisin ah, iyo 4,100 hektar oo digir ah. Dhulka webiyada ee Gedo 100% ee galayda hore loo abuuray iyo 50% hadhuudhka hore loo abuuray ayaa la soo sheegay inay khasaareen roobabka badan iyo/ama daadadka dartood. Waayeeelka goobtaasi waxa kale oo ay sheegeen in 80-90% beeraha muuska iyo babaygu ay burbureen.


Hiiraan qiyaastii 8,000 hektar oo dhulka dalaggu uu ka baxo ah ayay daadad qaadeen, 75% ka mid ahi waxay ahaayeen dalagga webiga iyo waadiyada laga waraabiyo, 25% waxay ahaayeen dalagga xiliga caadiga ah ka baxsan ee degmada Jalalaqsi. Khasaaraha Hiiraan gaadhay waxa ku jira 300-500 hektar oo ah khudradda wax lagu karsado oo qiimaheedu badanyahay. Aad ayay u liidata rajada laga qabo soosaarka galayda la waraabiyo ee gobollada Jubbooyinku. Dhulka ku fiican beeraha ee xoolo-iyto-beera dhaqatada ee gobolka Baay (degmooyinka Qansax-dheere iyo Baydhaba) hadhuudhka hore u ubaxaystay waxa la sheegay inuu xumaaday. Hase yeeshee goobaha qaar beeraha roobka ku baxa rajada laga qabo dalaggu way fiicantahay. Sida degmada Afgooye iyo dhulka digirta laga beero ee Galgaduud.

Haddii aanay jirin daadad kale, abuurka dhulka biya-fadhiisinka leh ee xiliga caadi ah ka baxsan ee Deyrta ayaa la samayn doonaa dhammaadka bisha Laba-iyto-tobnaad taasoo socon doontaa illaa dhammaadka bisha Labaad ama xitaa bisha Saddexaad meelaha qaar (ay ku jiraan Shabeellooyinka). Marka la eego baaxadda daadadka ku soo rogmaday goobaha qaar, soosaarka dalagga xiliga caadiga ah ka baxsan ee dhulka biya-fadhiisinka aad ayuu u weynaan kara. Hase yeeshee, wadarta kharasha soosaarka xiliga oo kordha iyo helitaanka abuur qiimihiisa la awoodi karo oo xadiddan ayaa laga yaabaa inay noqdaan qodobbo kooba soosaarkaas. Qaar ka mid ah dhulka webiyada waxa xoogga la saari doonaa dalagga wakhti gaaban ku bislaada iyo ka dhakhsa lacagta looga helo sida galayda koritaankeedu qaato 90-120 maalmood iyo sisinta koritaankeedu qaato 60-70 maalmood. Waxa la filayaa in soosaarka dalagga xiliga caadiga ah ka baxsan ee Deyrta '06/'07 iyo ka Gugu ay kulmi doonaan. Waxa ay halisi ka imanaysaa daadad iyo waxyeellada markaas soo gaadhaysa dalagga xiliga caadiga ah ka baxsan inta lagu jiro Guga 2007, maaddaama meelo badan oo jabay ay wali u furanyihiin waxyeello ka timaadda daadad. Dayactirka webiga iyo qalabka waraabinta ee goobo badan ayay noqon doontaa in mudnaan la siiyo si loo dhimo halista ka imanaysa daadadka ka hor Guga.


Inkasta oo qiimaha dalagga ee labadii bilood ee la soo dhaafay uu xasilloonaa badi suuqyada waaweyn ee koonfurta, oo ay ku jiraan Xuddur (Bakool), Bardheere (Gedo), Afgooye iyo Qoryooley (Shabeellada Hoose) iyo Dhoobley (Jubbada Dhexe) (eeg Warbixinta Xogta Suuqa ee FSAU, bisha Laba-iyto-Tobnaad '06), wuxuu aad u kordhay taniyo bishii Tobnaad suuqyada goobaha sida xun daadaku ay u saameeyeen ee ay jirto fursad-u-helid la'aan iyo saadka oo kooban. Tusaale ahaan, qiimaha dalaggu intii u dhaxaysay bishii Tobnaad iyo Kow-iyto-tobnaad wuxuu kordhay 17% Beled Weyne (Hiiraan), 20% Jowhar (Shabeellada Dhexe), iyo 54% Afmadow (Jubbada Hoose) (Tusmada 3). Iswaydaarsiga ganacsiga ama awoodda iibsiga ee ka dhaxaysa dalagga iyo mushahaarada maalintii hoos ayuu u dhacay taasoo la socota isbedellada caadiga ah ee xiliga. Hase yeeshee, hoos u dhacani wuu badanaa goobaha qaar qiimaha dalagga ee kacay iyo fursadaha shaqada ee yaraaday dartood taasoo ka timid daadadka balaadhan (Tusmada 4).

Goobaha saadka dalagga (cuntada an aasaasiga ahayn) ee la gaynayo suuqyadu uu xaddidanyahay fursad-u-helidda waddooyinka oo kooban ama aan jirin dartood, qiimaha dalaggu wuu kordhay taasoo keenaysa inuu hoos u dhaco iswaydaarsiga ganacsigu. Tusaale ahaan, Afmadow iswaydaarsiga ganacsiga ee kooxaha saboolka ah (kiiloo garaamka galayda marka loo eego mushahaarada shaqada maalintii) hoos ayuu si weyn ugu dhacay marka la barbar dhigo bishii hore. Tusaale ahaan, 5.64 kiiloo garaam ayuu ahaa bishii Kow-iyto-tobnaad laakiin

Tusmada 3: Suuqyo la xushay : Celceliska Qiimaha Dalagga ee Bishii (doolarka Maraykanka)



Tusmada 4: Celceliska Iswaydaarsiga Ganacsiga Bishee ee heer Gobol: dalag lagu bedasho mushahaaro



bishii Tobnaad wuxuu ahaa 17.50 kiiloo garaam, hoos u dhacay oo ka badan 60%. Guud ahaan, Jubbooyinka iswaydaarsiga ganacsigu wuxuu hoos uga soo dhacay 17.11 kiiloo garaam bishii Tobnaad oo wuxuu noqday 10.67 kg bishii Kow-iyto-tobnaad, inkasta oo tani ay weli ka fiicantahay intuu ahaa bishii Kow-iyto-tobnaad ee 2005 (7.5 kg) iyo bishii Kow-iyto-tobnaad ee 2004 (9.7 kg). Shabeellooyinka, iswaydaarsiga ganacsigu hoos ayuu u dhacay inkasta oo hoos u dhacaasi aanu aad u xumayn, wuxuu hoos uga dhacay 11.7 kg oo wuxuu noqday 10.5kg, isla muddadaas.

Hoos u dhaca fursadaha shaqada ee beeraha (sida guridda dhirta aan loo bahayn) daadadka dartood waxa yaraaday helitaanka fursadaha dakhliga ee qoysaska saboolka ah, taasoo culays dheeraad ah saaraysa awoodooda wax iibsiga. Hase yeeshe, maddaama daadadku ay yaraanayaan abuurka dalagga dhulka biya-fadhiisinka lehina uu bilaabmayo, fursadaha shaqadu way kordhi doonaan. Wakhtigan ay jiraan daadadku uma suurtoobayso FSAU inay ka samayso qiimayn dalagga xiliga Deyrta ah dhulka webiyada Jubba iyo Shabeelle sidii uu qorshuhu ahaa. Markaas FSAU waxay samayn doontaa qiimayn daadadka bisha Laba-iyto-tobnaad si ay u xaqiijiso warbixinaha hore ee ku saabsan waxyeellada soosaarka dalagga, kaydka hantida beerallada iyo waddooyinka. FSAU waxay ku samayn doontaa qiimayn dalagga xiliga caadi ah ka baxsan si ay u qiyaasto soosaarka dalagga xiliga caadiga ah ka baxsan bisha Labaad ama Saddexaad ee 2007.

Intii u dhaxaysay 21kii bishii Kow-iyto-tobnaad iyo 5tii bisha Laba-iyto-tobnaad FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan waxay waqooyi-galbeed ka sameeyeen qiimayn ah Kadib Goynta Dalagga Guga/Karanta 2006. 46 goobood oo ku yaalla Gebiiley, Boorama, Baki, Hargeysa, Sheekh, Oodweyne iyo degmooyin Burco ah ayaa ku jiray qiimayntan. Hay'adaha la isbahaysto waxa ku jiray Wasaaradda Beeraha, Ururka Horumarinta Beera (ADO), iyo FEWS NET. Natijoooyinka hordhaca ahi waxay tilmaamayaan in soosaarka hadhuudhku uu yahay qiyaastii 22,000 MT, soosaarka galaydu uu yahay 3,000 MT, wadarta soosaarka dalagga waa 25,000 MT. Wadarta soosaarka dalagga aad ayay uga sarraysaa caadi, waxana ay ku dhowdahay 150% celceliska dagaalkii ka dib, inkastoo uu xoogaha ka hooseeyo goyntii dalagga Guga/Karanta 2005 ee aadka u fiicnayd (25,715 MT). Gaar ahaan Gebiiley aad ayay uga sarraysay celceliska dagaalka ka dib, iyadoo matasha in ku dhow saddex meelood wadarta soosaarka. Roobab culus ayaa helay billowgii bisha Laba-iyto-tobnaad, roobabkaas oo la rumaysanyahay inay waxyeello gaadhsiiyeen dalagga goynta kadib. Haseyeeshe, khasaaruhu waxa la filayaa inuu yaryahay.

XOOLAHA

Roobabka Deyrta ee caadi ka sarreeya ee ka da'ay badi dalku waxay hore u marinayaan helitaanka iyo fursad-u-helidda saadka seeraha ee xoola-dhaqatada. Xaaladaha biyaha, daaqa iyo cowsku caadi way ka sarreeyaan badi gobollada taasoo keenaysa horumar xaaladaha jidhka xoolaha ah iyo in guuritaanka xoolaha ee gobollada dhexdoodu uu yaraado. Cabirka Cagaarka Dhirta ee bisha Kow-iyto-tobnaad wuxuu muujinyaa in xaaladaha dhirta ee dhammaan gobollada iyo dhulka soohdinta ee dalalka deriska ah ee Kiiniya iyo Itoobiya ay aad u fiican yihiin oo ay caadi ka sarreeyaan (eeg Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU, bisha Laba-iyto-tobnaad '06). Waxa la soo sheegay in taasi ay ka timi inaanu jirin guuritaanka xoola-dhaqatada isaga gudbaya soohdimaha.

Hase yeeshe, roobabka culus iyo daadadka ka jira dhulka webiyadu waxay keeneen in xoola-dhaqatadu ay u guureen dhulka gudaha. Dhammaan noocyada xooluhu way ka guureen dhulka daadadka oo waxay u guureen dhulka miyiga ee gudaha lamina filayo inay dhakso u soo noqon doonaan. Marka la eego xumaanta daadadka, xidhiidhka ka dhexeeya xoola-dhaqatada iyo beeralada ee ganacsiga iyo iswaydaarsiga ganacsiga (dalagga, cowska, caanaha, subagga iyo wixii la mid ah) way yaraan doonaan bilaha soo socda. Tani waxa laga yaabaa inay saamayn doonto helitaanka iyo fursad-u-helidda soosaarka xoolaha ee magaalooyinka iyo tuulooyinka ku yaalla dhulka webiyada.


Horumarka xaaladaha biyaha, daaqa iyo cowska dartood, soosaarka iyo qiimaha dhammaan noocyada xooluhu waxay muujinayaan horumar weyn goobaha ugu muhiimsan xoola-dhaqatada, oo ay ku jiraan gobollada koonfurta iyo dhexe. Dhulka ay daadadku ka dhaceen, baahida oo hoosyasa iyo gaadhid la'aanta suuqyada dartood sida qaybo ka mid ah Jubba, saadka xoolaha ee suuqyadu wuu hooseeyaa ama ma jiro, taasoo sii kordhinaysa qiimaha xoolaha.

Intii u dhaxaysay bishii Sagaalad iyo bishii Kow-iyto-tobnaad qiimaha lo'da teyada gudaha lihi wuxuu kacay 95% gobollada Jubbooyinka, dhulka hadhuudhka laga beero wuxuu kacay 25%, Shabeellooyinka wuxuu kacay 14%, waqooyi-galbeedna wuxuu kacay 60% (Tusmada 5). Isla muddadaas qiimaha riyaha teyada gudaha lehi wuxuu kordhay 32% Jubbooyinka, 15% dhulka hadhuudhka ugu badan laga beero, 12% Shabeellooyinka, 30% gobollada Dhexe, 31% waqooyi-bari, iyo 16% waqooyi-galbeed (eeg Warbixinta Xogta Suuqa ee FSAU, bisha Laba-iyto-tobnaad 2006).


Qiiimaha xoolaha ee kordhay wuxuu u faa'iidayn doonaa xoola-dhaqatada oo wuxuu hore u marin doonaa iswaydaarsiga ganacsiga (Tusmada 6). Hase yeeshe, gobollada sida ugu xun ay abaartu u saamaysay ee Jubbooyinka iyo Gedo badi xoola-dhaqatadu kama faa'iidayn doonaan qiimaha xoolaha ee kordhay maddaama tirada xoolahoodu ay si weyn u yaraatay iyo iyaga oo xoolaha haysta si ay dib ugu soo kabato tirada xooluhu iyo weliba suuqyada xoolaha oo aan la gaadhi karin iyo fursadaha ganacsiga oo kooban.

Soosaarka caanaha lo'du wuu koobanyahay tirada iyo dhalmada xoolaha oo kooban dartood, inkasta oo lo'da qaar la filayo inay dhalaan bisha Koowaad ee '07. Gobollada waqooyiga helitaanka caanaha geela iyo adhiguba way kordheen heerarka dhalmada xoolaha oo kordhay dartood. Xoola-dhaqatadu waxay ka faa'iidaynayaan baahida sare ee loo qabo dhoofinta xoolaha xiliga Xajka.

Tusmada 5: Celceliska Qiimaha Lo'da Teyada Gudaha leh ee bishii ee Heer Gobol (Doolarka Maraykanka)



Tusmada 6: Celceliska Bishee ee Iswaydaarsiga Ganacsiga ee Heer Gobol : Dalagga oo lagu bedasho Riyaha



beeraha/xoolaha

SUUQYADA


Inkasta oo ay kordhay xiisadda iyo isu diyaarinta dagaalku, heerka sarrifka Shiinka Soomaaliya iyo ka Soomaalilaandba way xasilloonaayeen marka loo eego Doolarka Maraykanka saddexdii bilood ee la soo dhaafay dhammaan dalka. Qiimaha badeecadda dibedda laga keenaa wuu xasilloonaa badi gobollada, marka laga reebo Jubbooyinka iyo qiimaha shiidaalka guud ahaan. Gobollada Jubbooyinka, qiimaha dhammaan badeecadda dibedda laga keenaa wuu kordhay intii u dhaxaysay bishii Tobnaad iyo bishii Kow-iyto-tobnaad taasoo si toos ah uga timi fursad-u-helid la'aanta gobolkaas kadib roobabka culus iyo daadadka oo jray badi waddooyinka. (Tusmada 7). Caadi ahaan gobollada Jubbooyinka qiimaha bariiska casi wuxuu kordhay 29%, sonkurtu waxay korodhay 15% qiimaha saliidda wax lagu kariyaana waxay korodhay 7% bishii Tobnaad illaa bishii Kow-iyto-tobnaad. Qiimaha Baatrooku hoos wuxuu u dhacay 11% waqooyi-bari, waqooyi-galbeedna 9% , gobollada dhexena 6% , Shabeellooyinkana 8% intii u dhaxaysay bishii Tobnaad illaa bishii Kow-iyto-tobnaad. Inkasta oo qiimuhu uu hoos u dhacay haddana qiimaha baatroolku weli waxa uu ka badanyahay labanlaab heerarkii uu ahaa 2004. Qiimaha baatroolku wuxuu kordhay illaa 10% Jubbooyinka iyo dhulka hadhuudhka laga beero. Jubbooyinka waxa keenay fursad-u-helid la'aanta ka timi daadadka iyo roobabka culus, dhulka hadhuudhka ugu badani uu ka baxana waxa keenay xayiraadda ay CSIC ku soo rogtay baatroolka la geeyo goobaha ay TFG haysato.

NAFAQADA

Dhowaan daadadka aadka u xun ee soo foodsaaray qaybo ka mid ah Koonfurta iyo gobollada Dhexe ee Soomaaliya waxa laga yaabaa inay saamayn ku yeelan doonaan xaaladda nafaqada ee kooxaha nugal. Illaa hadda saamaynta degdegga ahi ma muuqato waayo nafaqadu waa tilmaame natiijadiisa mar dambe la arko, laakiin saamaynta fursad-u-helidda cuntada iyo daryeelka caafimaadka ee yaraaday iyo weliba u dayacnaanta cuduradda biyaha laga qaado ee kordhay waxa laga yaabaa inay keeni doonaan nafaqa-darradu inay sii korodho aayaha dhow. Howlaha dadaalka ah ee lagu kormeerayo saamaynta nafaqadu way socdaan waxana ku jirta Qiimaynta Deyrta Kadi. Waxa intaas raaca, hay'aduhu (Jimciyadda Quruumaha ka dhaxaysa iyo Ururrada aan Dawliga Ahayn iyo hay'adaha kale waxay qaadayaan tallaabooyin si ay u dhimaan halista iyagoo hubinaya in fursad-u-helidda biyo nadiif ah, adeegyada caafimaadka iyo kordhinta tirada dadka ka faa'iidaysta xarumaha quudinta iyo nafaqaynta. Inkasta oo ay howlahaasi jiraan, haddana weli waxa jira goobo fursad-u-helidda adeegyada aasaasiga ah iyo gargaarka bina-aadamnimaduba ay wiiqmeen waddooyinka oo liita iyo halista ka imanaysa colaadda dartood.

Natiijooyinka ka soo baxay qiimaynta nafaqada Hawdka Hargeysa laga sameeyey bishii Kow-iyto-tobnaad waxay muujinayaan in heerarka nafaqa-darradu ay yihiin 8.1% (6.5-10.1 CI) GAM iyo 1.9% SAM (1.2-34.1 CI). Tani waxay asdaan u tahay xaalad feejjigaan leh marka la eego heerarka Nugaal iyo Goldogob. Natiijooyinka hordhaca ah ee labaduba waxay muujinayaan in xaaladaha nafaqadu ay xasilloonyihiin iyadoo natiijada Nugaal ka soo baxday ay tahay 8.9% (CI 7.2-11)) wadarta Nafaqa-darrada ee hadda taagan (GAM) iyo 1.4% (0.8-2.5) Nafaqa-darrada Aadka u Xun (SAM) . Goldogob natiijada ka soo baxday waa 11.1% (8.6-13.6) GAM iyo 1.1% (0.4-1.8) SAM. Eeg Warbixinta Nafaqada ee FSAU ee bishii Kow-iyto-tobnaad 2006. Falanqaynta qiimaynta nafaqada ee jirta waxay ku waddaa inay tilmaamayso in hababka cuntaysiinta ee conugyada iyo carruurta ay liitaan taasoo door ka ciyaaraysa nafaqa-darrada. Tani waxay ku muuqataa xilig hore ee carruurta lagu billaabayo cunto kabidda nafaqada ah, xiliyada cuntaysiinta oo aan badanayn iyo biyaha la siiyo carruurta isla marka ay dhashaan. Falanqayn dheeraad ah oo ku saabsan caqabadaha hooyooyinka ka hortaagan inay carruurta u cuntaysiiyaan hababka lagula teliyey ayaa loo baahanyahay.

Tusmada 7: Jubbooyinka: Qiimaha Badeecadda Dibedda laga Keeno marka loo eego Heerka Sarrifka Lacagta



Dumarka iyo carruurta ku barakacay daadadka, Jubbada Dhexe, bisha Kow-iyto-tobnaad '06

Warbixinaha dhowaan soo baxay iyo kuwa soo socda

- Warbixinta Nafaqada ee FSAU, bisha Kow-iyto-tobnaad , 2006
- Warbixinta Xogta Suuqa ee FSAU/FEWSNET, bisha Laba-iyto-tobnaad 2006
- Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET, bisha Laba-iyto-tobnaad 2006
- Taxanaha Farsamada ee FSAU _ Falanqaynta Guga 2006 Kadib, bisha Sagaalaaad 2006

XUSID: Warbixnaha kor ku qoran waxa laga helyaa websaytka FSAU: www.fsasomali.org

Technical & Managerial Support



Funding Agencies



Technical Partners

